

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Wiilkii la Jeclaa
oo Addoon
Noqday



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Kerr, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Isaaq aad bu u faraxsanaa. Wiilkiisii Yacquubna guriga ayuu joogay. Xitaa wuxuu soo dhaweeyey walaalkii oo bari ku dhaartay inuu dilo. Laakinse wiilashii Yacquub ma aysan faraxasanayn sababtoo ah Yuusuf, wiilkoodii ugu yaraa, oo ahaa kii uu jecla Aabbahooda.




Yuusuf walaalihii aad bay uga cadhoodeen markii uu u sheegay riyoooyinkiisii. "Xidhmadeydii ayaa kor u kacday oo istaagtay, oo kuwii walaalahay way u sujuudeen," Yacquub baa yidhi. Riyadatani waxay iila micne tahay Yuusuf inuu ka mudnaan badan yahay walaalihii.



Riyadii labaad ee
Yuusuf, qoraxda,
bisha iyo xiddigaha
ayaa u sujuuday isaga.
Xitaa Aabbihi baa ka
carooday isaga inuu
iska sare qaaday
waaliddiintiisii
iyo walaalihii.




Maalin buu Yacquub u diray Yuusuf inuu meeshii ay walaalihii Adhiga ku daajinayeen. Walaalihii waxay arkeen inuu u soo socdo. "Aynu dilno riyoolahan," ayay ku tashteen inay dilaan. Yuusuf se ma uusan ogayn khatarta ku soo food leh.




Ruubeen, walaalki ugu weynaa ayaa ku khilaafay.
"Waan inaydaan dhiiggiisa daadinin," Ayuu yidhi.
"Bal eega ceel baa halkan ku yaala! Ruubeen oo
qorshihiisa ahaa inuu samata bixiyo markii uu
gabalka dhaco".



Markii uu u
yimid Yuusuf,
walaalihii wey
qabteen, oo waxay
ka furteenshullugii
midabyada lahaa
ee sida goonida ah
Yacquub ugu tolax
wiilkiisii uu jeclaa.
Deedna waxay ku
tureen celkii
engagnaa.




Intuusan Ruubeen u soo noqon, ayaa waxaa ku soo dhawaday niman bayac mushtari ah geel wata oo ku sii socda waddada Masar "Aynu iibsanno Yuusuf" walaalkii Yuhuudah ku qayliyey. Heshiiskiina sidaa buu




u dhacay. Waxay ku iibiyeen Yuusuf labaatan xabadoo oo lacag ah.



Ilmeyn iyo cabsi, Yuusuf markii la saarayaya Awrka
si looga fogeeyo reerkiisa iyo waddankiisaba.






"Sow kan ma aha
shullugii Yuusuf.
Waa dhiig miiran.
Waxaannu ka helnay
banka." Walaalihii
arxan darnaa waxay
ogolaysiiyeen
Yacquub inuu amino
in bahal dilay wilkiisii
uu jeclaa. Yacquub
dharkiisii buu
jeejeexay oo geeri
baa gashay oo waa
la waayay qof qalbi
qaboojiya.




Masar, Yuusuf wuxuu ahaa qof cabsi badan oo kalinimo dareemayo. Laga yaabee inuu u xiisay gurigoodii. Laakiinse ma uusan ka baxsan




kareyn. Wuxuuna shaqaale ka ahaa gurigii Footifaar, oo ahaa nin aad muhiim ka ah xagga Masar. Foorifar wuxuu arkay inuu Yuusuf mar walba shaqo adag qabto wuuna aaminay.



"Wax walba wuu ku liibaanay,"
Footiifar baa maalin Yuusuf ku
yidhi. "Rabbiga ayaa kula jira.
Waxan doonayaa inaad madax
u noqoto shaqaalaha, oo aad
xukunto shaqada oo idil iyo
dhamaan shaqaalaha kale oo idil."




Rabbiga Fooriifar wuxuu
 siiyey sarac fiican oo wuu
 taajiray Yuusuf awgiis.
 Iminka waa nin loo baahan
 yahaya oo qiimo leh,
 Yuusuf weli Ilaah buu
 aad u aaminsan yahay.
 Laakiinse dhib buu la
 kulmayaa.




Footiifar naagtiisa waxay ahayd naag aad u
xun. Waxayna tidhi nin ii noqo. Wuuna ka
diiday. Ma uusanna ku dambaabin Rabbiga
hortiisa inuu wax xun
ku sameeyo Footiifar.




Koolkii auy naagtii isku dayday inay xoogto, Isagu wuu ka cararay. Laakinse waxay ka qabsatay koodhkiisii oo u hadhay.



"Addoonkaagii baa I soo weeraray," Footiifar naagtiisa ayaa sidaa calaacashay. "Bal eeg Koodhkiisii!" Footiifar wuu cadhooday. Laga yaabee inay naagtiisa been sheegeyso. Laakiin waa inuu wax un sameeyo. Maxay ahaan doontaa?



Footiifar Jayl buu dhigay Yuusuf.



Inkasta oo isagu waxba
samaynin, Yuusuf aad uma
cadhoonin ama kama xumaanin.

Lagayaabe inuu wax ka soo
bartay dhibkii hore oo middan
waxba lama aha markii loo eego,
haddii uu ilah sharfayo, Ilaahna
wuu sharfayaa isaga
- xitaa xabsi.



Wiilkii la Jeclaa oo Addoon Noqday

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 37, 39


"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



7



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

